
# Uranus: Jilboole



*Adobe Stock / revers_jr*

Meeraha "Uranus" Somaaliduna u taqaanno "Jil-boole" Waa meeraha todobaad marka qoraxda laga soo tiriyo. 19 jeer in kabadan innta dhulku qorraxda u jiro ayuu ujiraa qoraxda, waxa uu fogaan ku dhawaad sadex bilyan oo Km kaga wareegaa Qoraxda, waxayna ku qaadataa mudo 84 sanadood ah inuu ku dhamaystiro halwareeg oo uu Qoraxda ku sameeyo, maalintiisuna waa 17,3 saacadood.

Uranus er den syvende planeten fra sola. Den befinner seg mer enn 19 ganger lenger borte fra sola enn det jorda gjør, eller rundt 3 milliarder kilometer. Uranus bruker mer enn 84 år på å gå rundt sola én gang. Men planeten snur seg fort, dagen varer bare i rundt 17 timer.

Meeraha Uranus oo kudhawaad sadex bilyan oo km kaga wareegaya qoraxda waxay kuqaadataa mudo 84 sanadood ah inuu kudhamaystiro haljeer oo uu qoraxda kuwaraagaa,maalintiisuna waa 17,3 saacadood, wuxuu afar jeer kasii durugsan yahay masaafada uu qoraxda ujiro Meeraha Jupiter,waxay

geyeysiinaysaa inuu waqti aad uga badan ka ay kuqaadato Jupiter halkii wareeg ee uu Cad-ceeda kusameeyaa,waxyaalaha uu kaga baydhay Meeraha uraanus kuwa kale waxaa lagu tilmaamaa inuu leeyahay halqaab oo aan is doorin iyo samays siqudha uyaala oo aan isbedbedelin inkasta oo uu laftiisu kamid yahay meerayaasha Naqaska kasamaysan midabkiisuna udhowyahaya buluug cagaar xiga.

Meeraha Uranus wuxuu leeyahay xagal si aan caadi ahayn ujanjeedha oo 98 °. Dadka culuuntan kutalaxtegeyna waxay kumacneeyaan in ay suurta gal tahay waxa arintani kadhalatay isku dhac ay isku dhaceen waqti ilaahay uun cilmigeeda leeyahay walax cireed kale,inkasta oo aanay jirin cadaymo laysku halayn karo oo qeexaya aragtidaas.

Inkasta oo Uranus kamid yahay meerayaasha naqaska kasamaysan hadana waxa lagu macneeyaa in ubucdiisa hoose ama Bu'da Meerahani kasamaysan tahay dhagax 17.000 km dhumucdiisu le'egtahay heerkilkiisuna gaadhsiisanyahay 7000 °C kana siisarayso Biyo qaab haweed uumi baxay ah,oo ay kusii gadaaman yihiin Hydrogen iyo Helium qaradoodu le'egtahay 10.000 km ,halka Athmosfeerka sare ee Meeruhuna kasamaysantahay Hydrogen,Helium, Ammoniak iyo Methan ,midabka Uranus ee Cagaar-buluuga ah waxaa ugu wacan Curiyaha Methan oo marka cadceedu kudhacdo bixiya midabkan.

Athmosfeerka sare ee Uranus wuxuu heerkulkiisu gaadhaa -210 °C,kaasoo markuu Cad-ceeda kasii fogaadaba Qabowguna kussii siyaado,maadaama meerahani diirimaadku kuyaryahay kafogaanshaha Qoraxda awgeed majirto dhaq-dhaqaaq xiiso badan leh oo laga dareemaa ,oo aan ka ahayn inay dulhaadaan daruuro Caad ubadan oo kasamaysan Methan cristal barafoobey ah iyo Dabaylo kakaca meelo badan oo Meerahan dushiisa ah xawaarohooduna gaadho inta udhexaysa 350 km/h ilaa 600 km/h kuwaasoo badankoodu kadhaca agagaarka Badhaalaha socdana badiyaa in kabdan lix

bilood,wixii Athmosfeerkiisa kuhoos dahsoon rabi uunbaa cilmigeeda iska leh,inkasta oo xeeldheerayaasha culuunta xidigiska qaarkood ku andacoodaan inay kahoosayn karaan Baddo waaweyi,balse majirto wax cadayna oo ilaa hada loo heley figradahaas.

Uranus waa Meeraha tadobaad ee tirsiisanka Meerayaasha marka laga soo tiriyo dhinaca Qoraxda,hadii loo eego dhinaca fiisigiska waxaa lagala mid dhigi karaa Meeraha Neptune oo waxuu labaaxad yahay 14 jeer oo dhulkeena ah waxaanuu soo gelayaa kaalinta afraad ee qiyaasta baaxada Meerayaasha,hadiise laga eego dhinaca dhexroorka wuxuu waxyaruun kahor marayaa meeraha Neptune oo markaa Uranus usaamaxaysa inuu noqdo Meeraha sadexaad.

Cidhifka woqooyi iyo cidhifka koonfureed ee Meeraha Uranus wuxuu mid waliba sanadka Uranus badhkii yahay habeen ,sanadka badhkiisa kalena maalin,sanadka Uranus oo udhigma 84 sanadood oo dhulkeena ah marka laga shidaal qaadanayona waxay taa macneheedu noqonaysaa in 42 sanadood oo dhulkeena ahba hal cidhif oo Uranus ah ay u tahay maalin halka 42-ka sanadood ee kalena ay utahay habeen,cufka Meeraha Uranus iyo midabkiisa cagaar u ekaha ah ayay aad u adagtahay in siwanaagsan wax looga arko oogadasare ee Uranus.

Baaxadiisa kor uga kacsan qiyaasta 6,m0 waxaa suurta gal ah in habeenada cimiladu saafiga tahay cirkuna aanu daruuro iyo iftiin lagu indha daraan-daro lahayn kuusuura gelaysa inaad indhahaaga ku aragto Meeraha Uranus,waxase taa kohoraysa inaad marka hore taqaano jahada aad karaadinayso halka uu cirka kaga sugan yahay Meeraha Uranus,ama aad lakaashato Maababka lagu xardhay goobaha kawnka inagu xeeran ay kakala dhacaan Meerayaashu,hadii taa laga tegi waayana waxaa jira dhaqan soomaaliga dad aqoon qota dheer u leh cilmiga xidigiska kana saadaaliya maluugaha cirka oo wax laga korodhsan karo kuuna sheegi kara hadba xiliga

ay munaasabka tahay iyo meesha laga wajahayo Meeraha aad raacdada ugu jirtaa.

Shanta dayax ee ugu waaweyn uguna caansan Meeraha Uranus waxa lakala yidhaahdaa Miranda,Ariel,Umbriel,Titania **iyo** Oberon waxase kaloo jira Dayaxyo dheeraad ah oo uu Dayax-gacmeedkii Voyager2 daaha karogey sanadkii 1986 markii uu gaadhey Meeraha Uranus kuwaasoo iyagana loo bixiyey magacyadan soo socda Cordelia, Ophelia, Bianca, Cressida, Desdemona, Juliet, Portia, Rosalind, Belinda iyo Puck.

Waxay ahayd 1871 markii u horeysey ee uu Aqoonyahankii reer Jarmal ee William Herschel u aqoonsaday in Uranus yahay Meere,ilaa hada waxaa gaadhey hal dayax gacmeed kaasoo ahaa Voyager 2 sanadkii 1986 daahana karogey markii uhoraysey in Uranus leeyahay Daruuro iyo Ceeryaamo jiq ah oo kasamaysan Methan,wuxuu sidoo kale shaaca kaqaaday 10 Dayax oo dheeraad ah oo aan ahayn kuwii hore loo yaqaaney ee shanta ahaa oo uu iyana sawiradooda dhulka usoo diray,Voyager 2 waqti sidaa ubadan kuma uusan lumin Meerahan Uranus sabatoo ah waxaa sii qorshaysnaa in uu socdaalkiisaas sidoo kale kusahamiyo Meeraha Neptun oo Malyuunaad km oo kale kasii durugsan Uranus ,taasoo aanu waqtiga loogu tala galay inay cimriga Beytariyadiisu sii shaqeeyaan aanu uwada saamaxayn inuu waqwati intaa kabadan uu kulumiyo sahamiska Uranus.

Majirin aqoon kadurugsan oo aan ahayn in Meeraha Uranus dhexroorkiisu yahay 50,000 oo km sodon jeerna kasii durugsanyahay masaafada dhulkeenu qoraxda ujirooo hadii sikale loo dhigo noqonaysa in hal loo qaybiyey laba kun oo jeer wax kayari gaadho Uranus iftiinka Qoraxda ee dhulkeenu helaa ,27-kiisa Dayax waxaa gebi ahaanba kudahaadhan amaba ay kasamaysan yihiin Baraf,kooda ugu yar uguna xiga dhinaca Meeraha oo ah Miranda waxay baaxadiisu le'egtahay 400km oo keliya halkakooda ugu weyna lagu qiyaaso 1000 km ,waxaanuu muuqaal ahaan u egyahay sidiiyoo mar uu laba ukala

jabay hadana dib loo ragcay oo kale 27-ka Dayax ee Uranus waxaa intooda Badan loogu magac daray Musalsaladii Shakespeare.

Inkasta oo labada cidhif ee Uranus ay helaan Cad-ceed kabadan ta badhaalihiisa hadana mar walba waxaa kadiirimaad badan sababo aan ilaa maanta lagaranayn badhaalaha iyo inta kuxeeran.

Meeraha Uranus wuxuu sida Meeraha Venus uwareegaa si lidi ku ah ka Qoraxda taa macneheedu wuxuu noqonayaa Uranus wuxuu udub dhexaadkiisa ugu wareega Saacad wareeg,halka uu Qoraxdana ugu wareego Hab lid-saacad wareeg ah,isagoo kaaga darane sidii wax bar-bar ujiifa cidhifkiisa woqooyi iyo kakoonfureedna laba iyo afartankii sanadood ee dhulkeena ahba midkood wajahsanyahay majiiraha uu kusocdo,arintaasoo ilaa maanta walaac gelisa dadka cilmigan ku xeel dheer ,muran weyna kadhex dhalisa aqoon yahanada sida loo kala saarayo labada cidhif midkee Woqooyi ah midkeebaase Koonfur ah;arintan waxaa loo aaneeyaa in waqti aad ufog ay meerahan Uranus isku dheceen walax cireed kale oo sara jooga karidey (waase mala awaal aan wax cad oo loo cuskado lahayn).

Sida caadiga ah Meerayaasha waaweyn oo dhami waxay leeyihiin goobooyin kuwareegsan,Uranus laftiisuna wuxuu leeyahay 11 Goobo oo daciif ah markii uhorayseyna la ogaadey sagaal kamida sanadkii 1977 labada kale waxaa daah furay Dayaxgacmeedka Voyager2 24january 1986,Goobooyinkani waxay dhamaantood kasamaysan yihiin Baraf iyo Boodh loo malaynayo inay yihiin hadhaagii dayaxyo ay burburiyeen Commetyo herdiyey in kabadan mudo haatan laga joogo 100 milyan oo sanadood,goobooyinkan dhexroorkoodu wuxuu dhan yahay inta udhexaysa 40,000 ilaa 60,000 kun oo km,Goobooyinkani waxay aad uga duwanyihiin sidii kuwii aynu kusoo aragnay Saturn,waana qaar aad udhuudhuuban oo baaxadooda lagu qiyaaso mitiro iyo wax la jira midabkooduna madow yahay marka laga reebo Goobada ugu caansan uguna muuqa dheer oo layidhaahdo Epsilonring.